



STATE OF NEW YORK
OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

ERIC T. SCHNEIDERMAN
XEERILAALIYE GUUD



NEW YORK STATE EDUCATION DEPARTMENT
THE UNIVERSITY OF THE STATE OF NEW YORK

MARYELLEN ELIA
GUDOOMIYAH WAXBARASHADA
MADAXWAYNAHA JAAMACADA GOBALKA NEW YORK

Feebaraayo 27, 2017

Tallaabooyinkii ugu danbeeyay ee la xiriira soogalootiga ee ay qaadeen saraakiisha federalka waxay abuurtay cabsi iyo wareer wadankoo dhan ah. Dadka dagan Gobalka New York, kuwaasoo wakiiladayada iyo Gudiga Maamulayaasha Gobalka New York ba ay balan qaadeen inay ushaqeeyaan, ayaa si toosa ula soo xariiray wakaaladahayaga ayagoo ka waramaaya walwalka iyo suaalaha ay dhaqdhqaqaqyadaan keeneen. Xafiiska Xeer Ilaliiyaha Guud ee Gobalka New York (“OAG”) iyo Waaxda Waxbarashada Gobalka New York (“SED”) waxay qoreen maanta si ay ugu xaqijiyaan ardayda, dugsigyada, qoysaska, iyo bulshooyinka ee Gobalka New York in iskuuladayada ay ahaanayaan meel amaan ah oo ardayda dhamaan wax kubarankaraan.

Ayadoo laraacaayo Sharciga Waxbarashada Gobalka New York, ciyaalka shan sano kawayn labaatan iyo koowna kayar kuwaasoo aan haysan shahaado dugsi sare waxaa loogu talagalay inay galaan dugsigyada dawlada ee deegaanka iskuulka ay kunoolyihiin ayagoon lacag dugsigyada bixin. Waxaa sii dheer, deegaanada dugsiga waa inay xaqijiyaan in dhamaan ardayda gaartay da'da ay qasabka tahay inay wax bartaan ay qaataan casharo buuxa.¹ **Ciyaalka aan dukumiintiga laheyn, sida ciyaalka muaadinka U.S., waxay xaq uleeyihiin inay iskuulka galaan si buuxda maadaama ay buuxsheen shuruudaha da'da daganaanshaha ee uu qabo sharciga Gobalku.** Xaqiiqdii, Maxkamadda Sare ee U.S. waxay amartay tobonaan sano kahor, *Plyler v. Doe*, in Deegaanada iskuuladu aysan ardayda udiidi karin waxbarasho dawladeed oo bilaash ah ayagoo usababaynaaya dukumiinti la'aan ama inaysan muwaadiniin ahayn, ama waalidkood uusan lahayn ama dadka masuulka ah.²

Ayadoo laraacaayo, OAG/SED waxay kuxad gudubtay xuquuqdaan muhiimka ah ee ardayda aan dukumiintiga lahayn ayadoo laraacaayo tilmaanta deegaanada iskuulka ee in, marka ladiiwaangalinaayo, dugsigyada mawaydiin karaan suaalo laxiriira soogalootinimada taasoo

¹ *Arag* Educ. Law §§ 3202(1), 3205.

² *Plyler v. Doe*, 457 U.S. 202 (1982); *sido kale arag racfaanka Plata*, 40 Ed. Dep’t Rep. 552, Go'aanka Nambarkiisu yahay. 14,555.

muujinkarta soogalootinimada cunuga, sida in lawaydiyo nambarka Amaanka Bulshada.³ Waxaan sidoo kale kula talinaa in, markay deegaanada dugsiga ubaahdaan inay aruuriyaan macluumaad shuruudo ah oo waafaqsan sharciyada gobalka iyo/ama federalka, sidaas waa inay sameeyaan kadib marka ardayga iskuulka laga qoro si markaas aan lootusin in macluumaadkaan laxiriira soogalootinimada aan loo adeegsanayn ka go'aan gaarista in ardayga iskuulka lagu daro.⁴

Dhawaan, wakaaladahayagu waxay heleen suaalo si gaara uquseeya waajibaadka deegaanada iskuulka ayadoo la tixgalinaayo suaalaha ay suuragalka tahay inay kayimaadaan wakiilada Marakanka (U.S.) ee Soogalootiga iyo Laamaha Kastanada (“ICE”), ayna kujiraan codsiyada la kulmida ama waraysiga ardayda, ama inay fiiriyaan diiwaanada ardayga. Sidaad ogtahay, Sharchyo kala duwan ayaa kuqasbaaya deegaanada inay fuliyaan waajibaadyo sharci kuwaasoo laxiriira laan sharci oo ardayda suaalo waydiinaysa iskuulka dhexdiisa iyo aaminimada diiwaanada ardayga, ayna kujiraan Sharciga Maxkamadda Qoyska ee New York (“NYFCA”) iyo Sharciga Federalka ah ee Xuquuqaha Waxbarashada iyo arimaha shaqsiga ah (“FERPA”). Jabinta waajibaadka noocaas ah, xataa in labuuxiyo codsiga waaxyaha soogalootiga federalka ah, waxay soo bandhigi kartaa siraha deegaanada iskuulka. Sababtaan awgeed, wakaaladahayagu waxay kulatalinayaan dhamaan shaqaalaha dagmada inay latashtaan kormeerayaashooda iyo xeer ilaaliyaasha iskuulka isla marka ay helaan kayimid sarkaal waaxda soogalootiga federalka ah. Kahor intaan laga jawaabin wax codsi noocaan ah, shaqaalaha deegaanka iskuulka waa inay lagaashadaan kormeerayaashooda iyo xeer ilaaliyaasha kago'aan gaarista hadii aqbalida codsigaan ay sababi karto in deegaanka dugsiga uu kuxadgudbo sharci guud.

*Codsiyada lakulmida ama waraysi kaqaadida ardayga: **Waxay ahayd arin ay intii mudo ahba SED waday in laamaha amaanku aysan ardayga kasaari karin iskuulka ama aysan waraysan karin ardayga ayadoon ogolaasho lagahelin waalidka ardayga ama qofka masuulka ka ah**, marka laga reebo xaalado gaar ah (*tusaale*, markay laamaha amaanka haystaan fasax sax ah ama markii danbi lagu sameeyo gudaha iskuulka).*⁵ Saraakiisha iskuulka waxaa

³ *Arag, tusaale.*, Cosimo Tangorra, Jr., “*Dear Colleague*” (“*Kaaliyaha Qaaliga ahaoww*”) *Waraaq kusocota*, Waaxda Waxbarashada Gobalka New York (Sept. 10, 2014), <http://www.p12.nysed.gov/sss/documents/EducationalServicesforRecentlyArrivedUnaccompaniedChildren.pdf>.

⁴ Ayadoo ay jirto cadayn qaas ah ee aqoonsiga amaanka bulshada, SED ma doonayso in deegaanada iskuulka ay aruurshaan kaararka ama nambarada amaanka bulshada ee ardayda sababkastooq noqotaba ama waqtikasta, labadaba kahor ama kadib diiwaangalinta ardayga.

⁵ *Arag tusaale ahaan*, N.Y.S.E.D. Fikirka Talo 91 (June 17, 1959) (“saraakiisha noocay rabaan hanoqdaane kama saarikaraan cunug dhismaha iskuulka ayadoo ilmuhi si quman iskuulka udhiganaayo ayadoon fasax laga qaadan waalidka ilmaha si suaalo loo waydiinyo”); *sidoo kale arag* N.Y.S.E.D. Fikirka Talo 148 (Feb. 23, 1965) (“iskuullu si gaar ah malaha meel ardayda lagaliyo oo loogu talagalay in saraakiisha amaanka ama qaybaha kale ee sadexaad ay waraystaan ardayda ama kasaaraan dhismaha sabab kastoo tahayba.”) Tan waxaa qaba sharchyo kala duwan ooy kamidtahay, *nter alia*, NYFCA, taasoo ubaahan in sarkaal booliis ah uu sameeyo dadaal kasta oo macquul ah inuu si degdeg ah ula xariiro waalidka cunuga ama qofkasta oo masuul ka ah xanaanaynta cunuga marka cunug kayar da'da 16 ay xabsiga utaxaabaan laamaha amaanku, waxayna diidi karaan in ilmaha noocaas ah aan la waraysan karin,

lagula talinayaa inay lashaqeeyaan laamaha amaanka ayagoo raacaaya sharciga iyo siyaasada deegaanka ee iskuulka. Wuxaan si xooleh usoo jeedinaynaa in, hadii ICE ama laamaha kale ee federalka ee soogalootiga ay soo galaan iskuulka ayagoo raba inay ardayda arkaan (si ay uwaraystaan iyo/ama ay suaalo waydiyyaa n), deegaanka iskuulka waa inuu usheegaa dhamaan shaqaalahi inay laxiriiraan isla markaba kormeeraha iskuulka iyo xeer ilaaliyaha iskuulka si ay talooyin usiyyaan, gaar ahaana ayadoo laraacaayo waajibaadka Sharciga Waxbarashada, *Plyler*, iyo NYFCA kahor intaan loofasaxin lakulanka ardayga.

Codsiyada kalitaanka diiwaanada waxbarashada ardayga. Silamid ah, wakaaladaahayagu waxay kula talinayaan, marka codsadaan laamaha soogalootiga inay fiiriyan diiwaanada wax barashadaq ardayga, deegaanada dugsiga waa inay si degdeg ah ulatashtaan xeer ilaaliyaashooda, adeecida codsiga noocaan ah ayadoo lakahifaayo diiwaanada waxay xadgudub kunoqon kartaa FERPA.⁶ FERPA Waxay si guud uga mamnuucaysaa dugsigyada hela maalgalinta dawlada federalka ah inay kashifaan macluumaadka shaqsiga ah (“PII”) ee kujira diiwaanada waxbarasho ee ardayga ayadoon ogolaansho laga helin waalidka ama ardayga xaqa uleh. FERPA waxay fasaxdaa kashifaadaha noocaan ah ayadoon ogolaansho lahaysan kaliya hadii kashifaadu waxay qusayso xaalado kooban oo gaar ah oo kucad xeerarka dhaqangalinta sharciga. Xaaladahaan kooban waxaa kamida codsiyada ay sameeyyaan shaqsiyaadka si gaar ah loogu koobay ee dawlada federalka ah.⁷ **Hase yeeshi, codsiga kayimid ICE ama saraakiisha kale ee soogalootiga ee federalka ah kasoo ay kudoonayaan inay fiiriyaan PII-ka ardayga ee diiwaanada waxbarashada uma muuqdo mid waafqaaya xaaladaha gaarka ah ee FERPA ee xeerka guud oo ah in waalidku ama ardayga xaqa uleh iuu ogolaado in latuso qolo sadexaad.**⁸

Xafiiska SED ee Siyaasada Waxbarashada P-12 waxay sidookale maanta soo saaraysaa tilmaamo lasiyo dugsigyada iyo degmooyinka taasoo qusaysa Sharciga Xasaanada ee Dhamaam Ardayda (“DASA”) ayadoo laraacaayo waxbixinada laxiriira dhacdooyinka dhibaataynta ah ee dugsigyada dalkoo dhan kadhaday todobaad yadii dhawaa. Tilmaanta waxaa laga helayaan halkaan: <http://www.p12.nysed.gov/dignityact/documents/dasa-guidance.pdf>.

Waqtiga marka suaalo badan laga keeno talaabooyinka laxiriira soogalootiga ee laqaadaayo ayna qaadayso dawlada federalka ah, waa muhiim in aan, ka aqoonyahano ahaan iyo saraakiisha dawlada, waa inaan xasuusinaa mujtamacyada iskuulkayada muhiimada ay leedadahay isla jirka iyo xaqa ardayda ee ah inay helaan waxbarasho ayagoon kacabsan aargoosi intay

ilaa waalidkiis ama qofka masuulka ka ah, haduu joogo, laga siiyo talo xuquuqda ilmaha lana siiyo fursad uu goobjoog uga ahaado waraysiga cunuga. *Arag N.Y. Sharciga Markamadaynta Qoyska § 305.2; Qaybtu Jimmy D.*, 15 N.Y.3d 417 (2010).

⁶ *Arag* 20 U.S.C. § 1232g.

⁷ Ayadoo laraacaayo 34 C.F.R. §99.31(a)(3), kashifaad waa lasamayn karaa, ayadoo qusaysa shuruudaha 34 C.F.R. §99.35, ee wakiilada awooda uleh ee Madaxa guud ee maaliyada Maraykanka, Xeer ilaaliyaha Guud ee Maraykanka, Xoghayaha Maraykanka ee Waaxda Waxbarashada, ama maamulada Gobalka iyo kan deegaanka.

⁸ *Arag* 34 C.F.R. § 99.31.

iskuulka joogaan. Fasaladayadu waa inay amaan u ahaadaan dhamaan caruurta. Wuxaan marlabaad kaaga mahad celinaynaa shaqada aad qabatay dhamaanteed si aad ucaawiso ardaydayada, qoysaska, iyo bulshooyinka.

Mahadsanid,



MaryEllen Elia
Gudoomiyaha Waxbarashada



Eric T. Schneiderman
Xeer Ilaaaliyaha Guud